WASAARADDA QORSHEYNTA MAALGASHIGA & HORUMARINTA DHAQAALAHA

وزارة التخطيط والاستثمار والتنمية الاقتصادية

MINISTRY OF PLANNING, INVESTMENT AND ECONOMIC DEVELOPMENT

# WARBIXINTA BILLAHA

## MAAJO 2025




mop.gov.so

## DULMAR GUUD

Bishii Maajo 2025 waxay u ahayd Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha bil shaqo oo lagu muujiyey hannaanka hoggaamineed ee horumarinta dalka. Waxaa la qabtay shirar heer qaran iyo heer gobol, waxaa la sameeyay is-kaashi caalami ah, warbixino istiraatiiji ah ayaa la daahfuray, tababbarro lagu dhisayo awoodda shaqaalaha ayaa la qabtay, waxaana sidoo kale la sii xoojiyay Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025–2029).

# KULAN WADATASHI OO KU SAABSANAA QORSHAHA 7-AAD EE HORUMARINTA BULSHADA BARIGA AFRIKA OO MUQDISHO LAGU QABTAY



***Muqdisho, 29-ka Maajo 2025*** - Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha, Mudane Maxamed Shire ayaa si rasmi ah u soo xiray kulan wadatashi ahaa oo laba cisho socday, kaas oo lagu falanqeeyay sidii Soomaaliya ay uga qeyb qaadan lahayd diyaarinta Qorshaha 7-aad ee Horumarinta Bulshada Bariga Afrika (EAC Development Plan 2026–2031).

Kulankan oo lagu qabtay xarunta wasaaradda Qorsheynta Qaranka ayaa waxaa ka soo qayb galay dhammaan hay'adaha dowladda ee ka shaqeeya arrimaha horumarinta, waxaana si wadajir ah loogu gogol xaarayay aragtida iyo mudnaanta ay Soomaaliya dooneyso in lagu daro qorshaha cusub ee Bariga Afrika. Intii uu socday kulanka, hay'adaha dowladda waxay soo bandhigeen halbeegyo iyo hortabinno qaran oo la jaanqaadaya himilooyinka horumarineed ee Soomaaliya shanta sano ee soo socota. Mas'uuliyiintii shirka ka qeybgalay ayaa muujiyay muhiimadda iskaashi qaran iyo mid goboleed si Soomaaliya uga mid noqoto geeddi-socodka horumarineed ee Bariga Afrika.

# WASIIRKA QORSHEYNTA QARANKA IYO WAKIILKA UNFPA OO KULAN MIRODHAL AH KU YEESHAY




***Muqdisho, 28-ka Maajo 2025*** - Wasiirka Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha, Mudane Maxamuud C. Sheekh Faarax (Beenebeene) ayaa kulan miro dhal ah xarunta Wasaaradda kula yeeshay Mary Otieno, Wakiilka UNFPA ee Soomaaliya, iyo ku-xigeenkeeda Francis Anyasi.

Kulankan waxaa looga hadlay sidii Barnaamijka Dalka (CPD) ee UNFPA loo waafajin lahaa barnaamijyada iyo mashaariicda Qorshaha Isbeddelka Qaran, iyadoo laga fiirinayo guulaha iyo caqabadaha ka dhashay fulinta barnaamijkii hore.

Wasiirka iyo wafdiga UNFPA ayaa sidoo kale ka wada-hadlay sidii loo xoojin lahaa nidaamyada xog uruurinta si loogu taageero siyaasadaha, gaar ahaan tirakoobka dadka iyo guryaha. Kulanka ayaa sidoo kale xoogga saaray sidii sare loogu qaadi lahaa iskaashiga Wasaaradda iyo UNFPA si loo diyaariyo Barnaamijka cusub ee UNFPA, iyadoo loo marayo wadatashi iyo isku-duwid wanaagsan.

# LAASCAANOOD OO MARTIGELISAY TABABAR SARE OO LAGU XOOJINAYO KORMEERKA IYO QIIMAYNTA QORSHAHA ISBEDDELKA QARANKA



***Laascaanood, 26-ka Maajo 2025*** – Magaalada Laascaanood ee caasimadda Dawlad Goboleedka SSC-Khaatumo ayaa martigelisay tababar heer sare ah oo lagu horumarinayo tayada aqoonta Agaasimayaasha Kormeerka iyo Qiimaynta ee heer qaran. Tababarkan oo socday muddo usbuuc ah ayaa diiradda saarayay la socodka horumarka iyo diyaarinta warbixinada Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025–2029).

Tababarka waxaa si gaar ah uga faa'iideysanayay xubnaha Guddiga Qaran ee Kormeerka iyo Qiimaynta oo ka kooban Agaasimayaasha Kormeerka iyo Qiimaynta ee Wasaaradaha Qorshaynta Dowlad Goboleedyada, Maamulka Gobolka Banaadir, iyo shaqaalaha Wasaaradda Qorshaynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha.

Wasiirka Qorshaynta ee SSC-Khaatumo, Mudane Axmed Diiriye ayaa si rasmi ah u furay tababarka, isagoo si diirran u soo dhaweeyay ka qaybgalayaasha. Wasiirku wuxuu carabka ku adkeeyay muhiimadda ay leedahay in Laascaanood noqoto meel lagu qabto shirar iyo tababaro heer qaran ah, taas oo muujinaysa doorka sii kordhaya ee SSC-Khaatumo ku leedahay horumarka dalka.

Tababarka waxaa bixinta iyo hannaanka farsamo hoggaaminayay khubarro caalami ah, iyagoo xoogga saarayay in la mideeyo hababka kormeerka iyo qiimaynta ee heer qaran, lana xoojiyo tayada xog uruurinta, falanqaynta, iyo warbixinta natiijooyinka. Tababarkan waxaa sare loogu qaadayay aqoonta Kormeerka iyo Qiimaynta waxaa iska kaashaday Wasaaradda Qorshaynta Qaranka iyo bah-wadaagta horumarineed ee caalamiga ah. Waxay ka qaybgalayaashu kasbadeen aqoon, faham iyo xirfado la xiriira kormeerka wax ku oolka ah, taas oo si toos ah uga qayb qaadan doonta horumarinta hannaanka dowlad-dhiska, daahfurnaanta iyo isla xisaabtanka hay'adaha dowladda, gaar ahaan marka la fulinayo Qorshaha Isbeddelka Qaranka ee 2025–2029.

## DAAHFURKA WARBIXINTA ODOROSKA DHAQAALAHA SOOMAALIYA




***Muqdisho, 26-ka Maajo 2025*** **-** Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ayaa si rasmi ah u daahfurtay daabacaadda labaad ee warbixinta Odoroska Dhaqaalaha Soomaaliya. Warbixintan oo ay diyaarisay Waaxda Horumarinta Dhaqaalaha ee wasaaradda ayaa diiradda saareysa isbeddellada dhaqaale ee dalka laga soo bilaabo 2004 ilaa 2023.

Warbixintu waxay si qoto dheer u eegaysaa kobaca dhaqaale, fursadaha maalgashi, iyo caqabadaha jira. Waxaa kale oo lagu falanqeeyay arrimo muhiim ah sida wax-soo-saarka beeraha, shaqo la'aanta, maalgashiga gudaha iyo dibadda, iyo saameynta deyn-cafinta.

Wasiirka Qorsheynta Qaranka, Mudane Maxamuud C. Sheekh Faarax (Beenebeene) ayaa tilmaamay in warbixintani tahay aalad istiraatiiji ah oo taageeri karta go'aan-qaadasho sal leh, taasoo si buuxda u la jaanqaadaysa Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025–2029). Waxa uu ugu baaqay hay'adaha dowladda, ganacsatada iyo saaxiibada horumarka inay si wadajir ah uga faa'iideystaan.

Warbixintan sannadlaha ah ayaa ah mid xoojinaysa daahfurnaanta iyo isla xisaabtanka, isla markaana hagaysa jihada horumarineed ee dalka.

# SHIRARKII HANNAANKA WADA-SHAQEYNTA TIIRARKA QORSHAHA ISBEDDELKA QARANKA (NTP 2025–2029) OO LAGU QABTAY MUQDISHO



Muqdisho, 19–22 Maajo 2025 – Xafiiska Isku-duwidda Deeqaha ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ayaa martigeliyay shir afar maalmood socday oo lagu dardargelinayey hirgelinta Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025–2029). Shirkan ayaa diiradda lagu saaray afarta tiir ee horumarineed ee qaran, iyadoo si qoto dheer looga dooday doorka hay'adaha kala duwan ay ku leeyihiin horumarinta dalka.

Shirka waxa ka soo qeybgalay madax iyo wakiillo ka socday hay'adaha Dowladda Federaalka, Dowlad-goboleedyada, ururrada bulshada rayidka, ganacsatada, deeq-bixiyeyaasha, iyo hay'adaha Qaramada Midoobay. Kulamadan ayaa noqday madal muhiim ah oo lagu mideeyay jihada horumarineed ee dalka iyo iskaashiga dhabta ah ee looga baahan yahay hirgelinta Qorshaha.

## 19 Maajo – Daahfurka Shirarka & Tiirka Maamulka Dowladnimo

Shirka waxa si rasmi ah u furay Wasiirka Wasaaradda Qorsheynta Qaranka, Mudane Maxamuud C. Sheekh Faarax (Beenebeene), waxaana maalinttii koowaad lagu falanqeeyay Tiirka Maamulka Dowladnimo. Qodobbada laga dooday waxaa ka mid ahaa: Dib-u-eegista Dastuurka, Garsoorka & Xuquuqda Aadanaha, Doorashooyinka & is-diiwaangelinta iyo Dib-u-heshiisiinta & xasillinta.

Kulankani wuxuu ahaa mid laf-dhabar u ah dhismaha dowlad hufan, isla xisaabtan leh, oo si buuxda u adeegta shacabka.

## 20 Maajo – Tiirka Dhaqaalaha Waara




Maalinta labaad waxa diiradda la saaray kor u qaadidda dhaqaalaha dalka. Waxaa la is-weydaarsaday talooyin la xiriira: Kobcinta wax-soo-saarka gudaha (beeraha, kalluumeysiga, iyo warshadaha), Horumarinta kaabeyaasha dhaqaalaha (waddooyinka, dekedaha, adeegyada dijitaalka ah), Maalgelinta haweenka, dhalinyarada, iyo dadka nugul iyo Siyaasadaha miisaaniyadeed iyo hufnaanta maareynta maaliyadda.

Kulanku wuxuu horseeday is-afgarad ku saabsan mudnaanta sannadka 2025 iyo xoojinta wada-shaqeynta heerarka dowladda iyo bahwadaagta horumarineed.

## 21 Maajo – Tiirka Bulshada & Karaanka Aadanaha



Maalinta saddexaad waxaa lagu falanqeeyay arrimaha bulshada, iyadoo la xoojiyay aragtida ah in maalgelinta dadka ay tahay furaha horumar waara. Qodobbada ugu muhiimsanaa waxaa ka mid ahaa: Helitaanka waxbarasho tayo leh & horumarinta xirfadaha shaqo, Ballaarinta adeegyada aasaasiga ah (biyo, caafimaad, nadaafad), Wacyigelin bulsho si loola dagaallamo tahriibka, mukhaadaraadka, iyo takoorka, Ilaalinta dhaqanka & dhiirrigelinta farshaxanka Soomaaliyeed iyo Iskaashi lala yeesho Qaramada Midoobay iyo deeq-bixiyeyaasha caalamiga ah.

Agaasimaha Guud, Mudane Maxamed Shire, ayaa tiirkan ku tilmaamay "wadnaha qorshaha qaran", isagoo carabka ku adkeeyay in guusha la gaari karo keliya marka la maalgeliyo dadka Soomaaliyeed.

## 22 Maajo – Gunaanadka Shirarka & Tiirka Deegaanka iyo Adkeysiga Cimilada




Shirarkii ayaa si rasmi ah loo soo xiray iyadoo maalintaas la falanqeeyay Tiirka Deegaanka iyo Adkeysiga Cimilada. Waxaa si qoto dheer loo dul istaagay: Burburka deegaanka & xalalka waara, U adkeysiga isbeddelka cimilada iyo Maalgelinta deegaanka & iskaashi caalami ah.

Wasiirka Qorsheynta, Mudane Beenebeene ayaa xusay baahida loo qabo hannaan wada-jir ah oo daahfuran si loo gaaro natiijooyin muuqda oo ay ka faa'iideystaan bulshada Soomaaliyeed.

Shirarkan afarta maalmood socday waxay saldhig u ahaa hirgelinta NTP 2025–2029, iyagoo mideeyay aragtida iyo khibradaha dhammaan daneeyayaasha horumarka. Waxaa lagu heshiiyay in shirarka tiirarka la qabto afartii biloodba mar si loo hubiyo is-waafajinta dadaallada horumarineed iyo qiimeynta joogtada ah ee horumarka.

## DARDAR-GELINTA MAALGASHIGA WARSHADAHA SOOMAALIYA




***Muqdisho, 15ka Maajo 2025*** – Waaxda Maalgashiga ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha (SOMINVEST), iyadoo iskaashi la leh Barnaamijka SDIT ee Midowga Yurub ayaa si rasmi ah u bilaawday Daraasad Maalgashi oo lagu sameynayo Qaybaha Mudnaanta Leh ee Maalgashiga Warshadaha Soomaaliya. Daraasaddan ayaa ah mid istiraatiiji ah oo lagu qiimeynayo fursadaha maalgashi ee ka jira warshadaha Soomaaliya, gaar ahaan kuwa kobcin kara wax-soo-saarka warshadaha, sare u qaadi kara suuqyada shaqada, xoojin kara dhoofinta, isla markaana kaalin mug leh ka qaadan kara xaqiijinta sugnaanta cunnada qaranka. Mashruucani wuxuu la jaanqaadayaa yoolalka Qorshaha Isbeddelka Qaran (NTP 2025–2029), kaas oo diiradda saaraya horumar waara, koboc loo dhan yahay, iyo dhisidda dhaqaale ku tiirsan wax-soo-saarka gudaha.

## MADASHA HORUMARINTA THAILAND EE AFRICA



***Muqdisho, 12-ka Maajo 2025*** – Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha, Mudane Maxamed Shireayaa ka qeybgalaya Madasha Horumarinta Thailand ee Africa(Thailand Development Forum for Africa) oo lagu qabtay magaalada Pattaya, Thailand. Shirka waxaa martigeliyay Hay'adda Iskaashiga Caalamiga ah ee Thailand (TICA) waxaana ka soo qeybgalay wakiillo ka socday 17 dal oo Afrikaan ah.

Shirkan muhiimka ah ayaa fursad u ahaa Soomaaliya si ay u xoojiso iskaashiga horumarineed, u soo bandhigto Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP), isla markaana uga qeybqaadato wadahadallo wax ku ool ah oo ku saleysan kobcinta iskaashi iyo horumar waara. Mudane Shire waxaa madasha ku wehlinayay Dr. Xamsa Haadow, Xoghayaha Joogtada ah ee Wasaaradda Arrimaha Dibadda. Labadooduba waxay matalayeen dadaalka dowladda Soomaaliya ee dhanka iskaashiga iyo diblomaasiyadda horumarineed.

# MAS'UULIYIIN KA TIRSAN WASAARADDA QORSHEYNTA OO KA QEYBGALAYA DIB-U-EEGISTA HESHIISKA MAALGASHIGA COMESA



***Muqdisho, 7-da Maajo 2025*** – Agaasimaha Maalgashiga ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha, Mudane Maxamed Dubo iyo Agaasimaha Waaxda Kormeerka iyo Qiimeynta, Mudane Maxamuud Siciid Nuur ayaa magaalada Nairobi uga qeyb galay kulan heer sare ah oo ay isugu yimaadeen dhammaan Agaasimeyaasha Guud ee Hay'adaha Maalgashiga ee dalalka xubnaha ka ah Urur Goboleedka COMESA.

Kulankan muhiimka ahaa ayaa ujeeddadiisu ahayd dib-u-eegista Heshiiska Guud ee Maalgashiga COMESA (COMESA Common Investment Agreement – CCIA), kaas oo ah mid laf-dhabar u ah xoojinta Axdiga aasaasiga ah ee Ururka COMESA oo la dhisay sannadkii 1994. Axdiga COMESA, gaar ahaan qodobbada la xiriira maalgashiga, ayaan lagu sameyn wax dib-u-eegis rasmi ah muddo ku dhow 30 sano, taas oo ka dhigeysa dib-u-eegista hadda socota mid muhiimad gaar ah leh. Dib-u-eegista CCIA ayaa loogu talo-galay in lagu xoojiyo dadaallada lagu dhisayo Suuqa Guud ee COMESA (COMESA Common Market), laguna dardargeliyo iskaashiga dhaqaale ee gobolka, si loo xaqiijiyo horumar waara oo la wada leeyahay. Soomaaliya waxa ka go'an in ay kaalin firfircoon ka qaadato dadaallada lagu xoojinayo iskaashiga dhaqaalaha ee gobolka.

## KULANKA GUDDIGA MAAMULKA SANDUUQA WADAJIRKA SOOMAALIYA




***Muqdisho, 6-da Maajo 2025*** - Guddiga Maamulka Sanduuqa Wadajirka Soomaaliya (Somalia Joint Funf) ayaa isugu yimid kulan miro-dhal ah oo diiradda lagu saaray qiimeynta waxqabadka, dib u eegista barnaamijyada socda iyo kuwa la filayo, iyo dejinta mudnaanta maalgelinta ee qorshaha horumarinta Soomaaliya.

Kulanka oo ay si wadajir ah u shir-guddoomiyeen Wasiirka Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha, Mudane Xildhibaan Maxamuud C. Sheekh Faarax (Beenebeene), iyo Ku-xigeenka Wakiilka Qaramada Midoobay ee Soomaaliya (DSRSG/RC/HC), Mudane George Conway, ayaa waxaa kasoo qayb galay madaxda dowladda, deeq-bixiyeyaasha iyo bahwadaagta horumarineed. Qodobbada ugu muhiimsanaa ee ajendaha kulanka waxaa ka mid ahaa: Dib-u-eegista waxqabadka 2024, Warbixin guud oo ku saabsan barnaamijyada SJF iyo xaaladda maaliyadeed, Dib-u-eegista iyo wax ka beddelka Waajibaadka shaqo (ToR) iyo Go'aan ka gaarista kordhinta barnaamijka BASIS.

## DAAH-FURKA MADASHA MAALGASHIGA, GANACSIGA IYO ISKAASHIGA SOOMAALIYA IYO MIDOWGA YURUB



***Muqdisho, 6-da Maajo 2025*** - Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha, Mudane Mohamed Shire ayaa ka qayb-galay daah-furka rasmiga ah ee Madasha Maalgashiga, Ganacsiga iyo Iskaashiga Soomaaliya iyo Midowga Yurub (ITBP). Madashan cusub waxay astaan u tahay tallaabo horleh oo lagu xoojinayo isku xirnaanta suuqyada, soo jiidashada maalgashiga, iyo iskaashiga u dhexeeya dowladda iyo ganacsatada. Wasaaradda Qorsheynta ayaa door hoggaamineed ka qaadatay dhismaha madashan. ITBP waxay abuureysaa jawi ganacsi oo firfircoon, iyadoo isku xireysa ganacsatada, saamileyda siyaasadda, iyo bahwadaagta caalamiga ah si loo gaaro himilo dhaqaale oo mideysan.

# AQOON-ISWEYDAARSI LAGU ANSIXINAYAY WARBIXINTA LABAAD EE ODOROSKA DHAQAALAHA SOOMAALIYA




***Muqdisho, 3-da Maajo 2025*** - Waaxda Horumarinta Dhaqaalaha ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha (WQM&HDH) ayaa magaalada Muqdisho ku qabatay aqoon-isweydaarsi heer sare ah oo lagu ansixinayay Warbixinta Labaad ee Odoroska Dhaqaalaha Soomaaliya. Shirkan ayaa waxaa ka soo qaybgalay wakiillo ka kala socday hay'adaha dowladda federaalka, ganacsiga gaarka loo leeyahay, iyo bulshada rayidka ah, si ay u qiimeeyaan ugana doodaan saadaasha dhaqaale ee ugu dambeysay iyo jihada siyaasadeed ee lagu xusay warbixintan muhiimka ah ee ay diyaarisay wasaaraddu.

Furitaanka kulanka, Agaasimaha Waaxda Horumarinta Dhaqaalaha, Dr. Cabdinaasir Cumar Katib ayaa adkeeyay muhiimadda ay leedahay in siyaasadaha lagu saleeyo xog sugan, isaga oo sidoo kale ku baaqay in la xoojiyo wada-shaqeynta ka dhexeysa dhammaan qaybaha dowladda iyo bulshada si loo hormariyo mustaqbalka dhaqaale ee dalka. Mid ka mid ah qodobadii ugu muhiimsanaa ee shirka lagu soo bandhigay ayaa ahayd soo jeedin qoto dheer oo uu jeediyay Dhaqaaleyahan Maxamed Yuusuf Cabdiqani. Soo jeedintaasi waxay si qoto dheer u faaqiday tilmaamihii ugu dambeeyay ee dhaqaalaha (macroeconomic indicators), qiimeynta waxqabadka hay'adaha, saadaasha muddada-dhexe, iyo adkeysiga dhaqaalaha Soomaaliya, iyadoo sidoo kale lagu falanqeeyay caqabadaha joogtada ah ee ay ka mid yihiin isbeddelka cimilada iyo jahawareerka suuqyada caalamka.

Ka qaybgalayaashu waxay soo bandhigeen talooyin wax-ku-ool ah oo lagu horumarin karo nuxurka iyo saameynta warbixinta, kuwaasoo lagu dari doono nuqulka ugu dambeeya ee la daabici doono. Warbixinta Labaad ee Odoroska Dhaqaalaha Soomaaliya ayaa la filayaa inay door muhiim ah ka ciyaarto horumarinta siyaasadaha iyo go'aamada maalgashi ee dalka, iyadoo lagu saleynayo xog dhab ah oo la isku halleyn karo.


WASAARADDA QORSHEYNTA
وزارة التخطيط
MINISTRY OF PLANNING



MoPIED